



Talaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson SU'AALAH INTA BADAN LA ISKA

Talaalka Johnson & Johnson ee CentraCare iyo Carris Health

Waa maxay sababta CentraCare u joojisay talaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson?

Iyada oo la sameynayo taxadar, CentraCare iyo Carris Health waxa ay hakinayaan talaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson (oo loo yaqaano Janssen) taasoo ku saleysan talo soo jeedinta Hay'adda Maamulka Daawada & Cuntada ee Mareykanka (FDA) iyo Xarunta Ka Hortagga iyo Xakameynta Cudurada (CDC).

Tani waxa ay ka dhalatay xaalado naadir ah oo guntanka lagu arkay haween dhalinyaro ah oo qaatay talaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson. Hakintaas waxa ay culimada u siineysaa fursad in ay daraasad ku sameeyaan oo ay ogaadaan in xaaladahan ay la xiriiraan talaalka ama ay jiraan xaalado caafimaad oo horay u jiray. Talaalka Johnson & Johnson waxa uu dib u bilaabanayaa ka dib marka dib ugu noqosho lagu sameeyo oo la ogaado.

Waxa aan qaatay Talaalka Johnson & Johnson Wax dareen ah miyaan ka qabayaa?

Sida laga soo xigtay Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Minnesota in ka badan 184,000 reer Minnesota ayaa lagu talaalay Johnson & Johnson, iyada oo hay'addu aanay ogsooneyn xaalado laga soo sheegay guntanka dhiigga ee gobolka Minnesota.

Waddanka oo dhan, in ka badan 6.8 milyan oo talaalka Johnson & Johnson ayaa lagu talaalay dadka. CDC iyo FDA ayaa dib u eegaya xogta la xiriirta lixda xaaladood ee laga soo sheegay Mareykanka iyo dhiiga oo guntama dadka ka dib marka lagu talaalay Johnson & Johnson. Saameynta ay xaaladahan ku yeelanayaan talaalka weli lama ogaan.

Goorma ayaan u baahanahay in aan dhakhtar la xiriiro haddii la igu talaalay talaalka Johnson & Johnson?

Haddii lagugu talaalay Johnson & Johnson oo aad isku aragto madax xanuun, calool xanuun, lugo xanuun, ama neeftaoo kugu dhagta sadex todobaad gudahood ka dib maka lagugu talaalo, la xiriir dhakhtarkaaga sida ugu dhaqsaha badan ama gurmada degdegga ah.